COVID-19
Agabka Xaaladaha Degdegga ah ee Caafimaadka Dadweynaha

Febraayo 2023

Agabkani waxaa uu siiya la-hawlgalayaasha bulshada xogta asalka ah iyo ilaha si loogu diyaariyo dadka aad u adeegto isbeddelada suurtagalka ah ee caynsanaantooda caafimaad iyo faa'iidooyinka kale marka ay dhammaato xaaladda degdegga ah ee caafimaadka dadweynaha ee federaalka ee COVID-19 (PHE).

Sanduuqa qalabka waa la cusboonaysiin doonaa marka macluumaad badan la helo.

Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa xogta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir COVID-19 Communications Unit 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsoha.state.or.us.

Tusmada Nuxurka

Guudmarka 02

Xiriirka ah hadba Wegi 03

Macluumaadka Asalka ah 04

Cusboonaysiinta Macluumaadka Xiriirka 06

Agabyada 07

Farriimaha Muhimka Ah 08

Iimayl 09

Warside 10

Websayd, Qoraal & Barnaamijka
Wada-sheekeysiga ee Komniyuutarka 11

Qoraalka Hadalka Taleefanka 12

Baraha Bulshada 13

Qoraal Xayaysiin 14

Guudmarka

Xaaladda degdega ah ee caafimaadka dadweynaha ee federaalka ee COVID-19 (public health emergency, PHE) waxay Maamulka Caafimaadka Oregon (Oregon Health Authority, OHA) iyo Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon (Oregon Department of Human Services, ODHS) u keentay dabacsanaan sharciyeed iyo maalgelin ku meelgaar ah oo luugu talagalay dheefaha iyo adeegyada. Tani waxaa ka mid ah Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) iyo dheefaha kale oo ay ku jiraan adeegyada iyo taageerooyinka loogu talagalay dadka naafada ah iyo dadka waaweyn, iyo dheefaha cuntada.

Qaar badan oo ka mid ah dabacsanaanta iyo barnaamijyada ku meel gaarka ah waxay dhammaan doonaan marka uu meesha ka baxo PHE-ga COVID-19. Xeerka Qoondaynta Isku-dhafka ah ee 2023 (CAA), biilka maalgelinta federaalka ee la ansixiyay bisha Diseembar 2022, ayaa hagaya jadwal-waqtiyeedka lagu soo afmeeraayo waxyaabaha qaarkood sida u-qalmitaanka joogtada ah ee Qorshaha Caafimaadka Oregon iyo dheefaha Qaybinta Cuntooyinka Degdegga ah ee SNAP. Qaarka kale waxay dhamaan doonaan ama bilaabi doonaan inay meesha ka baxaan marka ku dhawaaqida federaalka ee PHE-ga COVID-19 uu dhaco taariikhda markay tahay Maajo 11, 2023.

Waanu soo dhawaynaynaa caawimadaada ku saabsan sidii dadka loogu diyaarin lahaa isbedelada waxtarka leh hadda.

Hadafkayagu waa in aan dadka inta ugu badan ee suurtogalka ah ku hayno in ay ku xirnadaan dheefaha oo lagu daboolo

La-hawlgalayaasha bulshadu waxay ciyaaraan door muhiim ah

La-hawlgale bulsho ahaan, waxaad leedahay door muhiim ah oo aad ka ciyaari karto si aad uga caawiso dadka aad u adeegto inay ilaashadaan ceymiskooda caafimaad iyo dheefaha kale. Waxaan u baahanahay la-hawlgalayaasha inay xasuusiyaan dadka qaata OHP iyo dheefaha kale, oo ay ku jiraan adeegyada iyo taageerooyinka loogu talagalay dadka naafada ah iyo dadka waaweyn, iyo dheefaha cuntada inay:

- Xaqiijiyaan in cinwaankooda boostada, lambarka taleefanka, iyo cinwaanka iimaylka ay yihiin kuwa ay haddeer isticmaalayaan si ay u helaan macluumaadka muhiimka ah ee ku saabsan dheefahooda.
- U feegijnaadaan waraaqaha ku saabsan dheefahooda ee ka imanaya gobolka.
- Bixiyaan macluumaadka uu gobolku u baahan yahay si uu uga caawiyo inay sii wataan helitaanka dheefaha.
- Ku xiraan dadka ilayaasha kale marka aysan u qalmin ama ay arkaan yaraanshaha dheefaha.

Waxaanu halkaan u joognaa inaanu ku taageerno!

Booqo Oregon.gov/OR-benefit-changes si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, oo ay ku jiraan gelitaanka Taxanaha Webinaarka PHE Unwinding Partner, Su'aalaha Inta badan La Isweydiiyo (FAQ) iyo ilaha kale.

Naga caawi inaan wadaagno fariimada muhiimka ah ee ficilka ku dhammaada

Waxaanu saddex weji xiriir kula yeelanay dadka qaadanaya Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) ama dheefaha kale, oo ay ku jiraan adeegyada iyo taageerooyinka loogu talagalay dadka naafada ah iyo dadka waaweyn, iyo dheefaha cuntada ee gobolka. Weji kastaa wuxuu leeyahay yool gaar ah. Abagkan waxaa loogu talagalay Wajiga 2-aad kaas oo socon doona ilaa Maarso 2023

Wejiga 1-aad: Ka hor Febraayo 1

Cusboonaysii macluumaadka la xiriirka

Ku dhiiri geli dadka inay cusboonaysiiyaan macluumaadka xiriirka.

Wejiga 2: Febraayo 1 – Maarso 31

U diyaargarow inaad cusbooneysiiso

- **Ogaysii dadka waxa ay filan karaan iyo sida la isugu diyaariyo.**
- **Ku boorri muhiimada iyo degdegsiinayaha ay u baahan tahay cusboonaysiinta macluumaadka xiriirka.**

Wejiga 3-aad: Abriil 1 iyo wixii ka dambeeya

Cusbooneysii ama gal marxallada kala-guurka

- **U sheeg dadka waxay u baahan yihiin inay sameeyaan si ay u ilaaliyaan caymiska iyo dheefaha ama ay u raadsadaan adeegyo kale.**
- **Ku dhiiri geli dadka inay kaga jawaabaan ogeysiisyada cusboonaysiinta isla markaaba.**

Macluumaadka asalka ah

Waxa ay filan karaan dadka helaya OHP iyo dheefaha kale oo ay ka midka yihiin adeegyada iyo taageerooyinka loogu talagalay dadka naafada ah iyo dadka waaweyn marka caymiska joogtada ah dhammaado:

- Dadka qaata OHP iyo dheefaha kale ee caafimaadka, oo ay ku jiraan adeegyada muddada-dheer iyo taageerooyinka iyo ka caawinta bixinta kharashyada Medicare, si otomaatig ah uma waayi doonaan dheefahooda.
- Oregon waxay bilaabi doontaa inay dib u eegis ku samayso u-qalmitaanka dhammaan dadka qaata OHP iyo dheefaha kale markay tahay Abriil 1, 2023.
- Dib-u-cusboonaysiinada waxaa loo qorshayn doonaa wajiyo iyadoo lagu saleynayo duruufaha qoyska halkii ay ka ahaan lahayd taariikhda isdiiwaangelintooda.
- Dadka intooda badan waxay sii wadi doonaan inay u qalmaan dheefahooda caafimaadka ee ay hadda haystaan, qaarna waxa laga yaabaa inay u gudbaan caymis caafimaad ama barnaamij kale oo ka duwan oo leh dheefa la dhimay. Qaar baa laga yaabaa inay lumiyaan lacagaha Medicaid ee adeegyadooda muddada dheer iyo taageerada ay ka helaan ODHS. Kuwa aan markaa u qalmin, hadafka Oregon waa in iyaguna lagu xidho xulashooyin kale oo laha geli kara daryeelka caafimaadka iyo adeegyada. Xaaladaha qaarkood, gaar ahaan adeegyada iyo taageerada muddada-dheer, wax dheefo ah oo u dhigma lama heli doono.

Waxa ay filan karaan dadka helaya OHP iyo dheefaha kale oo ay ka midka yihiin adeegyada iyo taageerooyinka loogu talagalay dadka naafada ah iyo dadka waaweyn inta lagu jiro xilliga dib u eegista u-qalmitaanka:

- Dadka helaya OHP ama dheefaha kale waxay ku heli doonaan waraaqo boostada gobolka. Waa muhiim in dadku ay soo gudbiyaan ciwaanka boostada, teleefankooda iyo ciwaanka iimaylka saxda ah si ay u helaan waraaqahan muhiimka ah.
- Dhammaan waraaqaha ka socdo gobolka waxaa ku jira macluumaad muhiim ah oo ku saabsan dheefahooda. Waraaqaha ayaa dadka u sheegi doona tillaabooyinka xiga, haddii ay jiraan, ee ay u baahan doonaan inay qaadaan si ay u sii wataan dheefaha caafimaadkooda.
- Dadka qaata dheefaha waxay heli karaan caawimaad si ay u raacaan tilmaamaha ku qoran waraaqaha iyagoo wacaya Xarunta Adeegga Macmiilka ONE ee 1-800-699-9075 ama booqanaya bit.ly/ohplocalhelpsi ay u helaan caawimad shakhsi ahaan iyada oo loo marayo la-hawlgale bulsheed oo la aamini karo. OHA iyo ODHS waxay aqbalaan dhammaan wicitaannada dhagoolayaasha.
- Xitaa haddii dadku aysan u qalmin OHP ama dheefaha kale ee gobolka, waxaa jira xulashooyin kale. Waa muhiim inay ka jawaabaan waraaqaha ka socda gobolka si ay u helaan caawimaada helida caymiska.
- Dadka qaata dheefaha sidoo kale waxay caawinaad ka heli karaan Xafiiska Waayeelka iyo Dadka Naafada ah, Xafiiska Hay'adda Aagga ee Barnaamijyada Gabowga ama Isku Filanaanta meel kasta oo ay ka joogaan Oregon. Ka raadi goobaha iyo lambarada taleefanka barta bit.ly/ONEOfficeLocations. Waxaad sidoo kale wici kartaa ka hor inta aadan tagin xafiis haddii ay dhacdo in lagugu caawin karo talefan ahaan. Turjubaano ayaa la heli karaa.

Xogta Asalka Ah, Waa socotaa

Waxa ay filan karaan dadka qaata dheefaha cuntada:

Intii lagu jiray PHE-ga COVID-19, dadku waxay ka heleen dheefooyin cunto oo dheeraad ah barnaamijyada aafada cudurka ee ku meel gaarka ah. Barnaamijyada cuntada degdega ah ee dhammaan doona ama meesha ka bixi doona waxaa ka mid ah:

- **Qaybinta Gurmadka ah ee SNAP:** Dadku waxay heleen Qaybinta Gurmadka ah ee SNAP bil kasta laga soo bilaabo Abriil 2020. Qaatayaasha SNAP waxay joojin doonaan helida Qaybinta Gurmadka ah ee SNAPwixii ka dambeeya Febraayo 2023. Laga bilaabo Maarso 1, 2023, dadku waxay heli doonaan oo keliya qaddarkooda dheefta SNAP ee caadiga ah ee billaha ah inta u dhaxaysa 1-da iyo 9-ka bil kasta. Dadku waxay ka heli karaan macluumaad dheeraad ah onlayn.
- **Aafada EBT iyo xagaaga P-EBT:** Dheefahan cuntada waxaa si xilliyeysan loogu soo saaray carruurta helitaankooda cunto ku filan oo tayo leh uu saameeyay COVID-19. Oregon waxa ay soo saari doontaa dheefaha xagaaga P-EBT ee dhaqangalka ah ee 2022 bartamaha Maarso 2023.

Intii lagu jiray PHE-ga COVID-19, qaar ka mid ah shuruudaha u-qalmitaanka SNAP waa la hakiyay. Siyaasadahaani ayaa mar kale isbeddeli doona marka PHE-ga COVID-19 uu dhammaado:

- **Shuruudaha Shaqada ee Dadka Waaweyn ee Jirkooda Awooda leeyahay ee aysan Cidan Ku-tiirsaneyn (ABAWD):** Shuruudaha shaqada waxay dib ugu bilaabmi doonaan ka qaybgalayaasha SNAP ee buuxiya shuruudaha heerka ABAWD laga bilaabo Luulyo 1, 2023. Meelaha qaar ee ka mid ah gobolka iyo dhulalka Qabaa'ilka ayaa laga dhaafi doonaa shuruudaha shaqada.
- **Ka dhaafitaanka ku meel gaarka ah ee SNAP ee loogu talagalay ardayda tacliinta sare (Biirinta Qoyska ee La Filayo ee ah $0, iyo u-qalmida waxbarasho ay shaqo la socoto):** Labadan ka dhaafitaan ee ku meel gaarka ah waxa la joojin doonaa iyadoo lagu salaynayo nooca codsiga ee la helay:
  - **Kiisaska cusub** waxay isticmaali karaan ka-dhaafitaanka ilaa Juun 10, 2023.. Kiisaska socda waxa ay isticmaali karaan ilaa Juun 30.
  - Ka dib Luulyo 1, 2023, **kiisaska socda** waxa ay ahaanayaan kuwo lagu daboolaya ka dhaafitaanka ku meel gaarka ah ilaa laga gaarayo waqtiga laga filaayo cusboonaysiinta.

Sida dadka qaata dheefaha cuntada ay tahay inay isku diyaariyaan:

- **Waa inay ilaaliyaan cusboonaanta macluumaadka xiriirka: Ku dhiirageli qaatayaasha SNAP inay hubiyaan** inuu gobolku haayo cinwaankooda boostada ee haddeer, taleefoon lambarkooda, iimaylkooda ama macluumaadkooda kale ee xiriirka. Marka sidan la sameeyo, gobolku wuxuu awoodi doonaa inuu kala soo xiriiro wax ku saabsan dheefahooda. Ka hel fursadaha aad ku cusboonaysiinayso macluumaadkaaga xiriirka onlayn, talefoon ahaan ama si fool-ka-fool ah uga hel barta Oregon.gov/OR-benefit-changes.
- **Ogow halka aad ka heli karto ilaha kale ee cuntada gudaha deegaanka:** Hormari needfood.oregon.gov si ay u noqoto ilo lagu caawiyo dadka sidii ay u heli lahaayeen ilaha cuntada ee bulshadooda dhexdeeda ku yaalo. Isticmaal agabka iskaashiga ee mareegta needfood.oregon.gov si aad u faafiso ereyga.

Cusbooneysiinta Macluumaadka Xiriirka

Xulashooyinkan lagu cusboonaysiinayo macluumaadka xiriirka waxa lagu tixraacin doonaa dhamaan agabkan.

Onlayn ka ah barta benefits.oregon.gov

- Samee koonta ama gali koontadaada aad horay u isticmaali jirtay
- Waxaa lagu heli karaa luuqada Ingiriiska iyo Isbaanishka

Taleefoon ahaan

1. Dadka ku jira Ururada Daryeelka Isku-dubbaridan (Coordinated Care Organizations, CCOs) ayaa CCO-kooda ka cusboonaysiisan karaan macluumaadkooda. Booqo bit.ly/ccoplans si aad u hesho lambarada telefoonka CCO.
2. Xarunta Adeegga Macmiilka
    - 1-800-699-9075 (dhammaan wicitaanada dhagoolaha waa la aqbalaa)
    - Isniinta ilaa Jimcaha, 7-da subaxnimo ilaa 6-da maqribnimo, Waqtiga Baasifigga
    - Turjubaano ayaa la heli karaa. Waxaad kula xiriiri kartaa turjumaanka 16 luqadood oo kala duwan ka hor inta aan laguu wareejin Xarunta Adeegga Macmiilka adiga oo dooranaya khadka luqadda bilaashka ah ee barta benefits.oregon.gov.
3. La-hawlgalayaasha Bulshada Deegaanka. Booqo bit.ly/ohplocalhelp si aad u hesho La-hawlgalayaasha Bulshada ee shatiga ay siisay OHP.
4. Xafiisyada Waayeelka iyo Dadka Naafada ah, Xafiiska Hay'adda Aagga ee Barnaamijyada Gabowga ama Isku Filanaanshaha meel kasta oo ay Oregon ka joogaanba.
    - Ka raadi lambarada talefoonka bit.ly/ONEOfficeLocations
    - Turjubaano ayaa la heli karaa.

Si fool-ka-fool ah

- Xafiisyada Waayeelka iyo Dadka Naafada ah, Xafiiska Hay'adda Aagga ee Barnaamijyada Gabowga ama Isku Filanaanshaha meel kasta oo ay Oregon ka joogaanba.
    - Ka raadi goobaha iyo lambarada taleefanka barta bit.ly/ONEOfficeLocations
    - Fadlan wac ka hor intaadan xafiis tagin.
    - Turjubaano ayaa la heli karaa.

Iskaangaree koodhka QR-ka si aad u heshid goobaha iyo lambarada talefoonka ee laga heli karo caawimaada fool-ka-foolka ah.

Agabyada isgaarsiinta

Farriimaha Muhiimka ah

Farriinta ku jirta agabkan waxay ku dhiiragelinaysaa dadka inay u diyaar garoobaan isbeddellada dheeftooda iyo inay cusboonaysiiyaan caynsanaantooda caafimaad. Wejiyada danbe, waxaanu ku dari doonaa macluumaadka ku saabsan fursadaha dadka aan hadda u qalmin OHP iyo sida ay ugu gudbi karaan noocyada kale ee caymiska.

Ka caawi dadka inay u diyaar garoobaan dhamaadka PHE-ga COVID-19 oo ay ogaadaan waxa ay ka filan karaan dheefahooda.

Intii lagu jiray masiibada COVID-19, badankoodu waxay haysteen caymiskooda OHP iyo dheefaha kale xitaa haddii ay isbeddel ku sameeyeen noloshooda, sida beddelka baahidooda adeegyada iyo taageerooyinka loogu talagaalay dadka naafada ah iyo dadka waaweyn, isbeddelka ku aadan dakhliga ama illaha kale ama noqoshada 65 sano jir iyo u qalmitaanka Medicare. Tani waxaa sabab u ahaa isbeddelada siyaasadda ee hoos yimaada Xaaladaha Degdegga ah ee Caafimaadka Dadweynaha ee COVID-19(Public Health Emergency, PHE).

Oregon waxay bilaabi doontaa dib u eegista u-qalmitaanka caafimaadka Abriil 2023. Gobolka ayaa kula soo xiriiri doona haddii ay u baahan yihiin macluumaad dheeraad ah si ay u eegaan inaad weli u qalanto OHP ama dheefooyinka kale. Dheefahaas waxaa ka mid ah adeegyada iyo taageerooyinka loogu talagalay dadka naafada ah iyo dadka waaweyn, iyo ka caawinta bixinta kharashyada Medicare. Haddii gobolku xiriirka kula haleeli waayo, waxaad waayi kartaa caymiskaaga caafimaad iyo dheefaha kale, xitaa haddii aad weli u qalanto.

Sidoo kale, intii lagu jiray masiibada COVID-19, Oregon waxay soo saartay dheefaha cuntada degdegga ah, oo ay ku jiraan dheefaha SNAP ee dheeraadka ah sida Qaybinta Gurmadka ah. Qaar ka mid ah shuruudaha u-qalmitaanka dheefaha waa la hakiyay. Barnaamijyadan dheefaha cuntada ee ku meel gaarka ah iyo isbeddellada u-qalmitaanka SNAP way dhammaanayaan ama meesha ay ka bixi doonaan dhawrka bilood ee soo socda.

Tani ayaa ah waxa aad samayn karto si aad isu diyaariso:

- **Ka dhig macluumaadkaaga xiriirka mid cusub -** Hubi in gobolku haysto ciwaanka boostada, lambarka taleefanka, iimaylka ama macluumaadka kale ee xiriirka ee ugu dambeeyay. Markaa, gobolku wuxuu awoodi doonaa inuu kaala soo xiriiro wax ku saabsan dheefahaaga. Ka hel fursadaha aad ku cusboonaysiinayso macluumaadkaaga xidhiidhka onlayn, telefoon ahaan ama shakhsi ahaan barta Oregon.gov/OR-benefit-changes.
- **Eeg boostadaada** – Gobolku wuxuu kaagala soo xiriiri doonaa boostada haddii ay macluumaad dheeraad ah kaaga baahan yihiin. Warqad ayaa ku ogeysiin doonta haddii aad u baahan tahay inaad buuxiso foomka cusboonaysiinta si aad u aragto inaad weli u qalanto OHP ama dheefaha kale.
- **Ka jawaab codsiyada macluumaadka oo soo gudbi foomamka cusboonaysiinta isla markaaba, haddii aad hesho** - Ka jawaabista codsiyada macluumaadka iyo buuxinta iyo soo gudbinta foomamka cusboonaysiinta isla markaaba waxay kaa caawin doontaa inaad iska ilaaliso daldoolada dheefahaada. Xitaa haddii aadan gabi ahaanba u qalmin OHP ama dheeefooyinka kale ee gobolka, waxaa laga yaabaa inay kuu jiraan ikhtiyaaro kale. Waa muhiim inaad ka jawaabto warqadda gobolka si ay kaaga caawiyaan inaad hesho caymis aad u qalanto. Xaaladaha qaarkood, waxaa laga yaabaa inaysan jirin adeegyo iyo taageerooyin la mid ah oo la heli karo. Haddii aad u baahan tahay caawimo oo aad rabto in aan cid kale kala hadalno dheefahaaga, waxaad u xilsaari kartaa wakiil idman kaas oo noqon kara xubin qoys ama saaxiib aad u doorato inuu ku caawiyo.
- **Ogow halka aad ka heli karto ilaha cuntada deegaanka -** Booqo needfood.oregon.gov si aad u hesho ilaha cuntada ee bulshadaada dhexdeeda kajira.

Iimayl u dir Xubnaha OHP iyo Qaatayaasha Dheefta

U dir iimaylkan qaatayaasha dheefaha si aad ugu sharaxdo sababta ay ugu baahan yihiin inay cusboonaysiiyaan macluumaadka xiriirka iyo sida loo sameeyo.

Mawduuca: ISBEDELLADA SOO SOCDA - Cusbooneysii macluumaadkaaga xiriirka si aad u haysato dheefahaaga

Jirka:
Gacali-ye/so MAGACA,

Intii lagu jiray masiibada COVID-19, inta badan xubnaha Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) waxay ilaashadeen dheefahoooda caafimaadka iyo kuwa kale xitaa haddii ay isbeddel ku sameeyeen noloshooda, sida isbeddel ku meel gaar ah oo dakhli ah ama gaarista 65 sano jir iyo u-qalmitaanka Medicare. Dadka dheefaha cuntada ka hela Barnaamijka Kaalmada Nafaqada ee Dheeraadka ah (Supplemental Nutrition Assistance Program, SNAP) waxay sidoo kale heleen dheefo cunto oo dheeraad ah. Tani waxaa sabab u ahaa isbedelada siyaasada ku meel gaadhka ah ee hoos yimaada Xaaladaha Degdegga ah ee Caafimaadka Dadweynaha ee COVID-19(Public Health Emergency, PHE).

Marka uu meesha ka baxo Gurmadka COVID-19, siyaasadaha mar kale ayay isbeddeli doonaan. Gobolka ayaa kula soo xiriiri doona si uu kuugu sharaxo waxaad u baahan tahay inaad sameyso si aad u sii haysato dheefahaaga. Gobolka ayaa laga yaabaa inuu u baahdo macluumaad dheeraad ah si uu u eego haddii aad weli u qalanto OHP ama dheefaha kale, oo ay ku jiraan adeegyada iyo taageerooyinka loogu talagalay dadka naafada ah iyo dadka waaweyn, iyo ka caawinta bixinta kharashyada Medicare. Haddii gobolku uu kula soo xiriir kari waayo, waxaad waayi kartaa dheefahaaga, xitaa haddii aad weli u qalanto. Waxaad sidoo kale heli doontaa ogeysiis haddii dheefahaaga cuntada SNAP uu isbedeli doono. Taasi waa sababta ay muhiim u tahay inaad cusboonaysiiso cinwaankaaga boostada, lambarka taleefanka iyo cinwaanka iimaylka. Haddii aad u baahan tahay caawimo oo aad rabto in aan cid kale kala hadalno dheefahaaga, waxaad u xilsaari kartaa wakiil idman kaas oo noqon kara xubin qoys ama saaxiib aad u doorato inuu ku caawiyo.

Xaqiijiyo ama cusbooneysii macluumaadkaaga xiriirka:

GALI XULASHOOYINKA LIISKA EE BOGGA 5AAD AMA XULASHOOYINKAAGA HADDII AAD TAHAY CCO AMA LA-HAWLGALAHA BULSHADA EE SHATIYAYSAN.

Sawir koodka QR ama tag Oregon.gov/covid-phe-partners si aad u hesho qoraalkan oo ku qoran luqado badan

Maqaalka Warsidaha

Isticmaal qoraalkan si aad ugu dhiirageliso xubnaha OHP iyo qaatayaasha dheefaha inay cusboonaysiiyaan macluumaadkooda xiriirka.

Isbedellada soo socda: Cusbooneysii macluumaadkaaga xiriirka si aad u sii wadato helitaanka OHP iyo dheefaha kale oo ay ku jiraan adeegyada iyo taageerooyinka loogu talagalay dadka naafada ah iyo dadka waaweyn, iyo dheefaha cuntada ee aad u qalanto.

Adiga ama qof qoyskaaga ka tirsan ma leedihiin Qorshaha Caafimaadka Oregon iyo dheefaha kale oo ay ku jiraan adeegyada iyo taageerooyinka loogu talagalay dadka naafada ah iyo dadka waaweyn, ama dheefaha cuntada? Hadday sidaa tahay, waxaad u baahan tahay inaad u diyaargarowdo isbeddellada. Sababta waxaa weeye in barnaamijyada iyo shuruudaha ku meel gaarka ah ee loo dejiyay dheefahaan intii lagu jiray Xaaladda Degdegga ah ee Caafimaadka Dadweynaha (PHE) ee COVID-19 ay isbeddeli doonaan.

Marka Xaalada Degdegga ah ee COVID-19 ay meesha ka baxdo, gobolka ayaa kula soo xiriiri doona si uu kuugu sharaxo waxa dhacaya iyo waxa aad u baahan tahay inaad sameyso si aad u ilaaliso dheefahaaga. Gobolka ayaa kula soo xiriiri doona haddii ay u baahan yihiin macluumaad dheeraad ah si ay u eegaan inaad weli u qalanto dheefaha aad hadda haysato. Haddii gobolku kula soo xiriiri waayo, waxaad waayi kartaa caymiskaaga, xitaa haddii aad weli u qalanto. Taasi waa sababta ay muhiim u tahay inaad cusboonaysiiso cinwaankaaga boostada, lambarka taleefanka iyo cinwaanka iimaylka si aad u hesho warar cusub oo muhiim ah oo aad ka jawaabi karto si aad u sii wadato dheefaha aad u qalanto.

Waa kuwan waxyaabo aad samayn karto si aad u diyaargarowdo.

Xaqiiji ama cusbooneysii macluumaadkaaga xiriirka:

GALI LIISKA XULASHOOYINKA EE BOGGA 6-AAD AMA XULASHOOYINKAAGA HADDII AAD TAHAY CCO AMA LA-HAWLGALAHA BULSHADA EE SHATIYAYSAN.

Eeg boostadaada: Gobolku wuxuu kaagala soo xiriiri doonaa boostada haddii ay macluumaad dheeraad ah kaaga baahan yihiin. Warqadan ayaa ku ogeysiin doonta haddii aad u baahan tahay inaad buuxiso foomka cusboonaysiinta si aad u aragto inaad weli u qalanto OHP ama dheefaha kale. Buuxi foomka oo ku soo celi gobolka isla markaaba si ay kaaga caawiso inaad ka fogaato daloolada caymiskaaga.

Xitaa haddii aadan gabi ahaanba u qalmin OHP, waxaa jira ikhtiyaaro kale oo adiga kuu yaal marka waa muhiim inaad ka jawaabto waraaqaha si uu gobolku kaagu caawiyo inaad hesho caymis kale. Haddii aad hesho adeegyada iyo taageerooyinka muddada-dheer ah oo aadan hadda u qalmin, waxaa laga yaabaa inay jiraan qaar ka mid ah ilaha bulshada oo ku caawin kara. Kala hadal maamulaha kiiskaaga si aad kaalmo dheeraad ah u hesho.

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, fadlan na soo ogaysii.

Sawir koodka QR ama tag Oregon.gov/covid-phe-partners si aad u hesho qoraalkan oo ku qoran luqado badan

Mareegta, Fariimaha Qoraalka ah iyo Sheekaysiga

Qoraalka Websaydhka

Hubi in gobolka uu kuula soo xiriiri karo wax ku saabsan caymiskaaga Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP), adeegyada iyo taageerooyinka loogu talagalay dadka naafada ah iyo dadka waaweyn, ama dheefaha cuntada! Qaar ka mid ah barnaamijyada federaalka ee COVID-19 ee Gurmadka ah ayaa dhowaan bilaabi doona inay meesha ka baaxan. Tani waxay bedeli kartaa ama joojin kartaa dheefahaaga haddeer jira.

Cusbooneysii cinwaankaaga boostada, lambarka taleefanka iyo ciwaanka iimaylka si aad u hesho warar cusub oo ku saabsan dheefahaaga oo aad barato sida loo ilaaliyo dheefooyinka aad u qalanto. BooqoOregon.gov/OR-benefit-changessi aad u cusboonaysiiso macluumaadkaaga xiriirka.

SMS/ Farriin Qoraal ah

- Hubi in gobolka uu kugula soo xiriiri karo caymiskaaga OHP, adeegyada muddada dheer iyo taageerada, ama dheefaha cuntada ee SNAP. Cusbooneysii macluumaadkaaga xiriirka manta. Wax badan ka ogow barta Oregon.gov/OR-benefit-changes.

- Waxaa la gaaray waqtigii dib loo cusbooneysiin lahaa caafimaadkaaga iyo dheefooyinka kale. Hubi inaad cusboonaysiiso cinwaankaaga boostada, lambarka taleefanka, iyo ciwaanka iimaylka si aad u hesho warqadaada cusboonaysiinta. Wax badan ka ogow barta Oregon.gov/OR-benefit-changes.

Qoraalka Sheekaysiga

Inta aad halkan joogto… hubi in gobolka uu kugula soo xiriiri karo weydiinta wax ku saabsan caymiskaaga OHP, adeegyada muddada dheer iyo taageerada, ama dheefaha cuntada ee SNAP. Cusbooneysii macluumaadkaaga xiriirka maanta si aad u hesho ogeysiisyadaada. Wax badan ka ogow barta Oregon.gov/OR-benefit-changes.

SCAN ME

Sawir koodka QR ama tag Oregon.gov/covid-phe-partners si aad u hesho qoraalkan oo ku qoran luqado badan

Qoraalka Taleefanka

Ma jiraan shaqaale la tacaala wicitaanndada ku saabsan OHP ama dheefooyinka kale ee gobolka? Isticmaal qoraalkan si aad dadka ugu dhiirageliso qaadashada dheefaha si ay ugu diyaar garoobaan isbadellada.

Gobolku waxa uu isu diyaarinayaa in uu waraaqo cusboonaysiin ah u diro dadka qaata dheefaha.
Waxaan rabnaa inaan hubinno inaad hesho waraaqahaaga.
Tani waxay ka dhigan tahay in la hubiyo in gobolku haysto ciwaankaaga hadda iyo inaad furto oo aad ka jawaabto waraaqaha ay soo diraan.
Ma jeclaan lahayd inaad wax badan ogaato?

1. **Ma ciwaankaaga boostada, taleefoon lambarkaaga ama ciwaanka iimaylkaaga ayaa baddelmay?** Hadday haa tahay, waxaan kuu sheegi karaa sida loo cusbooneysiiyo macluumaadkaaga. Ma jeclaan lahayd inaad wax badan ogaato? (Haddii ay haa tahay, u gudub xagga hoose).
2. **Fiiro gaar ah u yeelo boostadaada.** Warqadda ka soo baxday gobolka ayaa ku ogeysiin doonta waxaad u baahan tahay inaad sameyso si aad u aragto haddii aad weli u qalanto OHP, adeegyada iyo taageerooyinka loogu talagalay dadka naafada ah iyo dadka waaweyn, ama dheefaha cuntada ee ka yimaada gobolka.
3. **Buuxi foomkaaga cusboonaysiinta (haddii aad mid hesho)** - Buuxi foomka oo isla markiiba ku soo celi gobolka. Xitaa haddii aadan gabi ahaanba u qalmin OHP ama dheefaha kale, waxaa muhiim ah inaad ka jawaabto warqadda gobolka si ay kaaga caawiyaan helitaanka caymis kale. Haddii aad u baahan tahay caawimo oo aad rabto in aan cid kale kala hadalno dheefahaaga, waxaad u xilsaari kartaa wakiil idman kaas oo noqon kara xubin qoys ama saaxiib aad u doorato inuu ku caawiyo.

Waxaad ku cusboonaysiin kartaa macluumaadkaaga xiriirka onlayn ahaan, fool-ka-fool ahaan ama telefoon ahaan Ma jeclaan lahayd inaad wax badan ogaato?

Onlayn ka ah benefits.oregon.gov

- Samee akoon ama gali akoonkaagi aad horay u isticmaali jirtay
- Waxaa lagu heli karaa luuqada Ingiriiska iyo Isbaanishka

Taleefoon ahaan

1. Xarunta Adeegga Macmiilka
   - 1-800-699-9075 (dhammaan wicitaanada dhagoolaha waa la aqbalaa)
   - Isniinta ilaa Jimcaha, 7-da subaxnimo ilaa 6-da maqribnimo, Waqtiga Baasifigga
   - Turjubaano ayaa la heli karaa. Waxaad kula xiriiri kartaa turjumaanka 16 luqadood oo kala duwan ka hor inta aan laguu wareejin Xarunta Adeegga Macmiilka adiga oo dooranaya khadka luqadda bilaashka ah ee barta benefits.oregon.gov.
2. La-hawlgalayaasha Bulshada Deegaanka. Booqo bit.ly/ohplocalhelpsi aad u hesho La-hawlgalayaasha Bulshada ee shatiga ay siisay OHP.
3. Xafiisyada Waayeelka iyo Dadka Naafada ah, Xafiiska Hay'adda Aagga ee Barnaamijyada Gabowga ama Isku Filanaanshaha meel kasta oo ay Oregon ka joogaanba.
   - Ka raadi goobaha iyo lambarada taleefanka barta www.oregon.gov/dhs/offices/pages/one-services
   - Turjubaano ayaa la heli karaa.
4. Dadka ku jira Ururada Daryeelka Isku-dubbaridan (Coordinated Care Organizations, CCOs) ayaa CCO-kooda ka cusboonaysiisan karaan macluumaadkooda. Booqo bit.ly/ccoplans si aad u hesho lambarada telefoonka CCO.

Si fool-ka-fool ah

- Xafiisyada Waayeelka iyo Dadka Naafada ah, Xafiiska Hay'adda Aagga ee Barnaamijyada Gabowga ama Isku Filanaanshaha meel kasta oo ay Oregon ka joogaanba.
  - Ka raadi goobaha iyo lambarada taleefanka barta www.oregon.gov/dhs/offices/pages/one-services
  - Fadlan wac ka hor intaadan xafiis tagin.
  - Turjubaano ayaa la heli karaa.

Iskaangaree koodhka QR-ka si aad u heshid goobaha iyo lambarada talefoonka ee laga heli karo caawimaada fool-ka-foolka ah.

Dhigaalada Baraha Bulshada

Boostiga/Bandhiga 1-aad

Ka samaynta akoon barta benefits.oregon.gov waa habka ugu fudud uguna dhaqsiyaha badan ee aad macluumaadkaaga ku cusboonaysiin karta. Marka aad galiso macluumaadkaaga xiriirka, calaamadee sanduuqyada si aad ugu hesho qoraal iyo farriimo iimaylka ee @ORHumanServices ee ku saabsan dheefooyinkaaga.

Boostiga/Bandhiga 2-aad

Barnaamijyo badan oo ah kuwa Gurmadka COVID-19 ee federaalka ayaa bilaabay inay dhammaadaan. Tani waxay bedeli kartaa ama joojin kartaa dheefahaaga hadda. La soco wixii ku saabsan isbeddellada muhiimka ah ee dheefahaaga. Cusbooneysii macluumaadkaaga xiriirka adiga oo:

- Koontadaada ONE ka galayo barta benefits.oregon.gov
- Wacaya 1-800-699-9075
- Booqanaya xafiiska @ORHumanServices
- Ku diraya boosto ama fakis macluumaadkaaga

Wax badan ka ogow barta benefits.oregon.gov.

Boostiga/Bandhiga 3-aad

Waxaa lagula soo xiriiri doonaa marka macluumaadka looga baahdo si loo xafido OHP-gaaga iyo dheefahaaga kale oo ay ku jiraan adeegyada iyo taageerooyinka loogu talagalay dadka naafada ah iyo dadka waaweyn, iyo dheefaha cuntada. Xog ogaal ahow. Hubi inaad furto fariimo kasta oo ka imanaya @ORHumanServices isla markaaba, hana dhib dhigin inaad ka jawaabto!

SCAN ME

Sawir koodka QR ama tag Oregon.gov/covid-phe-partners ee loogu talagalay boostiyada bulshada ee ku qoran luqado badan

HUBI INAAN KUU HALEELI KARNO WAX KU SAABSAN FAA'IIDOOYINKAAGA

Barnaamijyo badan oo ah kuwa Gurmadka COVID-19 ee federaalka ayaa dhammaan doona. Tani waxay bedeli kartaa ama joojin kartaa dheefahaaga hadda.

Xaqiiji in macluumaadkaaga xiriirka midka aad haddeer isticmaasho si aad u ilaaliso OHP-gaaga, adeegyadaada iyo taageerooyinkaaga loogu talagalay dadka naafada ah, iyo dheefaha cuntada Ku cusbooneysii macluumaadkaaga xiriirka onlayn ahaan, telefoon ahaan, ama fool-ka-fool ahaan.

Onlayn ka ah barta benefits.oregon.gov

- Samee akoon ama gali akoonkaagi aad horay u isticmaali jirtay
- Waxaa lagu heli karaa luuqada Ingiriiska iyo Isbaanishka

Taleefoon ahaan

Xarunta Adeegga Macmiilka

- 1-800-699-9075 (TTY 711)
- Isniinta ilaa Jimcaha, 7-da subaxnimo ilaa 6-da galabnimo wakhtiga Baasifiga
- Turjubaano ayaa la heli karaa. Khadka luqadda ka hel barta benefits.oregon.gov.

Si fool-ka-fool ah

Xafiisyada Waayeelka iyo Dadka Naafada ah, Xafiiska Hay'adda Aagga ee Barnaamijyada Gabowga ama Isku Filanaanshaha meel kasta oo ay Oregon ka joogaanba.

- Ka raadi goobaha iyo lambarada taleefanka barta bit.ly/ONEOfficeLocations
- Fadlan wac ka hor intaadan xafiis tagin.
- Turjubaano ayaa la heli karaa.

Baro qaabab badan oo aad ku cusboonaysiini kartid macluumaadkaaga xiriirka.

Iskaangaree koodhka QR-ka ama booqo **oregon.gov/covidphe**

SCAN ME

Iskaangaree koodhka QR-ka si aad u heshid goobaha iyo lambarada talefoonka ee laga heli karo caawimaada fool-ka-foolka ah.

Oregon Department of Human Services

Oregon Health Authority

Oregon HEALTH PLAN

Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa xogta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir COVID-19 Communications Unit lambarka 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsoha.state.or.us.

100-163900_OHA 4356 (02/17/2023) SOMALI